

2023 Wuxuu Ahaa Sanadkii Ugu Wacnaa

Kuwani waa Qodobbadayada ugu sarreeya

Waan idin salaaney Seattle! Waxaan ahey Greg Spotts, Agaasimaha Waaxda Gaadiidka Seattle. Inta lagu jirey 2023, Waxaan ka dhageystey boqollaal dad ah oo joogay in ka badan 100 xafladaha dhageysiga bulshada. Tani waa milicsiga SDOT ee waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee dib-u-eegista sanadka!

Intii lagu jirey Janaayo, waxaan siinay kaarka gaadiidka dadka deggan guryaha dadweynaha Seattle. Intii lagu jirey Febraayo Waxaan daabacnay dib u eegis buuxda oo ku saabsan barnaamijyadayada badbaadada.

Xilligii xagaaga ee dhismaha, waxaanu dhamaystirnay mashruucyo waaweyn iyo kuwo yaryar. Mashruucyadani waxay ka dhigaan mid badbaado leh oo raaxo leh in lagu socdo, baaskiilka lagu kaxeeyo, iyo isticmaalka gaadiidka. Intii lagu jirey Agoosto, waxaan daabacney Qorshaha Gaadiidka Qabyo-qoraalka ah ee Seattle. Tani waxay gacan ka geysan doontaa hagidda maalgashiyadayada 20-ka sano ee soo socda. Intii lagu jirey Aktoobar, waxaan dhul ka jabinay (amba qaadney) mashruuca badbaadada ee MLK. Kani waa kii ugu horreeyay ee afar mashruuc oo waaweyn oo haad baaskiil ah oo laga sameeyo Koonfurta ee Seattle.

Si loo hagaajiyo safarka baska, waxaanu furnay khadka RapidRide H ilaa Galbeedka Seattle. Waxaan sidoo kale hagaajinnay Waddada 44 ee Jaamacadda Washington. Inta lagu jiro 2024, waxaan dhamaystiri doonaa mashruuca RapidRide G Line waxaan bilaabi doonaa dhismaha RapidRide J Line. Waxaan sidoo kale hagaajin doonaa East Marginal Way si aan u wadno dhaqdhaqaaqa xamuulka oo aan ku dhammeyno si xooggan Canshuurta Dhaqaaji Seattle.

Ma sugi karo inaan bilaabo shaqada ina hor taal 2024, anoo kaashanaya adinka, bulshadeenna Seattle.

Mahadsanid oo Hel Sanad Cusub oo Farxad leh!



Greg Spotts
Agaasimaha, Waaxda
Gaadiidka Seattle

Tan waa sida aad ugu xirnaan karto oo aad qayb uga ahaan karto!

Booqo www.seattle.gov/transportation

Wac (206) 684-ROAD (7623)

limeyl ku soo dir: 684-ROAD@seattle.gov

Akhri: sdotblog.seattle.gov/

Nagala soco: www.seattle.gov/transportation/about-us/contact-us




Seattle
Department of
Transportation



Waxaan qaadnay talaabo si'aanu u hormarino ammaanka (badbaadada)

Waxaa hirgaliney **98** calaamadaha ugu horreeya ee lagu lugeeyo!

Mashaariicdeena waaweyn ayaanu hore u dhaqaajinay



Waxaan qorsheyney

(naqshadeeyney) **25** mashaariic.

Waxaan bilownay dhisidda **13** mashruuc.

Waxaan dhameyney **13** mashruuc.

Waxaan ka gaarnay natiijooyinka mashaariicda Canshuurta Dhaqaaji Seattle.

Waxaan laami saarnay **11** mayl ee khadka waddooyin.

Waxaan soo celiney **26** baloogyada dariiqyada lugeynta.

Waxaan dhameyney **26** mashaariic si'aanu u sameyneyo wadooyin amnaan ah oo carruurta ku lugeeyaan, wax rogrogmada ku wadaan, oo ay ku kaxeystaan baaskiilka dugsiga.



*Tirakoobyadani waa ilaa September 2023.

Waxaan wajahnay codsiyada adeegga macaamiisha si heer sare ah

Waxaan maareyney

19,200+ su'aalaha iyo walaacyada iyada oo loo marayo khadka taleefanka dadweynaha.

Waxaan xiriir la sameyney bulshadda Gaadiidka Seattle Qorsha



Waxaan qabanay **4,500+** wada hadal heer sare ah oo lala yeeshay dadweynaha.

Waxaan helney **8,000+** fikrado lagu hormarinayo Seattle!

Waxaan helney dhaqaale dheeraad ah

Waxaan helnay deeqo federaal iyo gobol ah


wadar ahaan ah **\$65** milyan.





Waxaan horumarinay mashaariicda badbaadada iyo baaskiilka ee Koonfurta Seattle

Kooxdayadu waxay horumar ka sameeyeen mashaariicda muhiimka ah. Waxaa ka mid ah Beacon Hill, East & West Marginal, Georgetown ilaa South Park, Georgetown ilaa Downtown, iyo MLK Jr Way S.



Waxaan dib u hagaajiney amaanka Aurora Avenue North

Kooxdayagu waxay kala hadashay bulshada si ay u qiyaasan badbaado ka wanaagsan Aurora Ave N. Waxaa kale oo aanu horumarinay baloogyada dariiqyada lugta iyo dhirta la ilaaliyo.



Waxaan dayactirney buundooyinkeena

Kooxdayadu waxay dayactireen buundooyinka magaalada. Tan waxa ku jiray gurmada degdeg ah oo lagu hagaajinayo buundada Spokane St Swing (buundada hoose) horraanta 2023, ka dib burbur intii lagu jiray duufaanta barafka.



Waxaan tijaabiney gawaari koronto ku shaqeeya

Kooxdayadu waxay bilaabeen barnaamijyo tijaabo ah si ay u bilaabaan inay koronto ku shaqeysiyaan gaadiidka SDOT, qalabka, xaaqayaasha laymanka baaskiilka, iyo in ka badan.

Waxaan qaadnay talaabo si'aanu u hormarino ammaanka (badbaadada)

Kooxdayadu waxay dhamaystireen dib u eegis buuxda oo ku saabsan barnaamijyada ayada badbaadada. Waxa kale oo aanu horumarinay talaabooyin ay ka mid yihiin in ka badan 70 calaamadood oo cusub oo ah Leexasho Majirto Markii Nalku Guduudyahay, magaalada oo dhan.



Waxaan bedelnay waayo-aragnimadii gaadiidka

Kooxdayadu waxay fureen adeega RapidRide H Line. Waxaan dhamaystirnay naqshadaynta mashaariicda RapidRide J Line iyo Route 40. Waxaan gaadhay 75% oo dhammaystiran dhismaha khadka Madison RapidRide G.

Horey u eegista 2024

Waxaan bilaabeynaa sanad cusub oo ay ka buuxaan horumar iyo ujeedo! Markaan galayno sanadka ugu dambeeya ee Cod-bixiyuhu Ansixiyay Cashuurta Guuritaanka (Dhaqaajinta) Seattle, ujeedkayagu waa adag yahay. Waxaan gaarsiin doonaa sinnaan, mashaariic saameyn leh oo magaalada oo dhan ah.

Waxaan dhulka ku jabin doonaa mashruuca RapidRide J Line, kaas oo siin doona ikhtiyaaro ku sii maran dad badan. Waxaan bilownay dhismaha hagaajinta amniga iyo shaqada laamiga ee Ballard. Waxaan sidoo kale fidineynaa jidadka baska ee Rainier Ave S ee koonfur-bari ee Seattle. Waxaan sidoo kale dhamaystiri doonaa mashruuca Madison RapidRide G Line ee bartamaha Seattle!

Badbaadadu waxay ku fadhidaa meesha ugu sareysa ee mudnaantayada. Waxaan ku rakibeynaa calaamado badan oo lugeeyaha-koowaad iyo calaamado casaan ah oo aan leexasho lahayn. Waxaan sidoo kale xoojineynaa dariiqyada laymanka baaskiilka. Tani waxay sare u qaadi doontaa badbaadada qof kasta! Mawduucyadeenna 2024 waa: "Keen Waddooyin Ammaan ah.

Wax ka qabashada xiisadda cimiladu waa hadaf weyn. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan helno gaadiid koronto oo badan si aan u yareyno qiiqa oo aan u gaarno yoolalka cimilada. Waxaan la shaqayn doonaa ganacsiyada, kuwa aan faa'iido doonka ahayn, iyo wakaaladaha kale ee dadweynaha.

Kaligeen ma qaban karno. Waxaan rajeyneynaa inaan aragno inaad ka qaybqaadato markaan u beddeleyno aragtiyadan mid xaqiiqo ah. Si wada jir ah adiga, Bulshada Seattle oo Mid ah, waxaan bedeli karnaa nidaamka gaadiidka ee magaalada.

Waxaan daabacney Qorshaha Gaadiidka Seattle oo dhameystiran



Waxaan si xooggan u dhammayn doonaa Canshuurta Dhaqaaji Seattle ee cod-bixiyuhu ansixiyay.



Waxaan ballaarin doonaa gaadiidka magaalada oo dhan

